Tilmaamaha guud ee Imtixaanka Gacanta/xirfadda

Akhri macluumaadkan inta aad sugaysid galintaanka Imtixaanka Gacanta/xirfadda.
Kaadhkanwaa inloo celinayaa Qiimeyaha imtixaanka kaa qaadaya.

Marka qolka imtixaanka laguugu yeero, Qiimeeyuhu waxa uu:

- ku waydiinayaa in uu arko aqoonsigaaga/taysaradaada (ID gaaga).
- ku tusayaa qalabka loo baahan yahay in imtixaanka lagaaga qaado.

Waxa Imtixaanka Gacanta/xirfadda aad samayn doontaa saddex xirfad gacmeed oo aad samayn kartid marka qof aad daryeel siinaysid. Marka aad samaysnaysid xirfadaa, waxa Qiimeeyuhu uu qorayaa oo uu kormeerayaa waxqabadkaaga. Waxa aad samaynaysaa xirfaddan adiga oo qof kale ama sanam qof u eeg kaashanaya. Waxa qofka ama sanamka aad kaashanayso ula dhaqantaa sidii oo uu yahay qof sax ah oo kalkaalin aad siinaysid.

Ka hor inta aan la bilaabin imtixaanka Qiimeeyuhu waxa uu:

- ku siinayaa kaadh ay ku qoran tahay liis xirfadaha lagaaga baahan yahay in aad samaysid iyo faahfaahin xirfad kasta la socota.
- in uu kuu akhriyo faahfaahinta xirfad kasta la socota. (turjumaan ayaa ku caawin doona haddii aad imtixaanka ku galaysid af aan Ingiriisi ahayn).
- in uu kuu sheego marka lagaa qaadayo imtixaanka iyo marka aad qof kale imtixaankii u matali doonto daryeel qaate.

Imtixaanka xirfadda, qofka daryeel qaatuhu waxa lagu metelayaa:

- qof maskaxdiisu ay soo jeeddo oo kula shaqaynaya.
- qof waxyaabaha qaarkood aan awoodi karin.

Marka qofka daryeel qaataha uu metelayo qof bani aadami (oo aan ahayn sanam), qofkaasi waxa:

- loo ogol oo kaliya in uu hadlo marka uu ka jawaabayo su'aalahaaga.
- in uu dhaqdhaqaaqi karo oo uu dhaqdhaqaaqa qayb ka qaadan karo.
- uu dhaqdhaqaaq samayn karo oo kaliya marka la waydiiyo.

Marka aad matalayso qof daryeel qaate ah waa:

- in aad ahaato qof soo jeeda oo kalkaalinaya oo raacaya talooyinka iyo waxa laguu sheego.
- qofka imtixaanka galayaa marka uu ku waydiiyo oo KALIYA aad dhaqdhaqaaq samaysid.
- qofka imtixaanka galayaa marka uu su'aal ku waydiiyo oo KALIYA aad u jawaabtid.
- in Qiimeeyuhu uu ku siin karo faahfaahin dheeraada oo ku saabsan doorka aad matalaysid.
- in aan si kastaba ha ahaatee la caawin karin qofka imtixaanka galaya. Tan waxa ku jirta in aad siisid tilmaan afka, wajiga ama hab kale oo aad u il jabisoba. Dhaqankan oo kale waxa lagu tilmaamaa qish (xaditaan imtixaan), waxana ay sababaysaa in labada qofba laga eryo imtixaanka iyada oo aan wax natiijo siinayn. Dhacdooyinkaas waxa loo gudbin doonaa Waaxda Caafimaadka ee Washington.

Waxyaabaha soo socda waa in aad niyadda ku hayso marka aad ku jirtid Imtixaanka Gacanta/xirfadda:

- Waa in aad dhab ahaan u samaysaa xirfadaha.
- Waa in aad Xirfada isugu xigsiiso sida ay isugu xigaan ee ku qoran Kaadhka faahfaahinta ee Qiimeeyuhu kuu dhiibayo. Waxa aad dib u akhriyi kartaa Kaadhka Faahfaahinta mar kasta oo aad rabto wakhtiga aad imtixaanka ku jirto.

Kaadhka geddi si aad u akhridid tilmaamaha ku qoran dhabarkiisa➔

Copyright © 2010 Prometric Inc., a Delaware corporation. All rights reserved.

- U akhri tilmaamaha xirfad kasta si degan. Imtixaankan waxa aad saddexda xirfadoodba matalaysaa in aad qof isku mid ah daryeel siinaysid, xataa iyada oo dad kala duwan ama sanam aad ku isticmaalaysid xirafda. Xirfadaha qaarkood waxa tilmaamta ku jirta fiirooyin gaar ah oo sheegaya waxyaabaha qofka daryeelka qaadanayaa uu samayn karo iyo waxa aanu samayn karayn ee ku adag. Tusaale ahaan, Marka aad samaynayso habka dharka loogu labiso waxa uu daryeel-qaatuhu metelayaa in jidhka dhinac ahaan awoodiisu yar tahay. Arrintan awood gabku waxa ay gaar u tahay habka dharka loo xirto oo kaliya. Tilmaamaha goonida ah ee dhinaca awoodu yar tahay kama qayb aha labada dhinac ee kale ee imtixaanka.
- Qalabka iyo agabka loo baahan yahay in imtixaanka lagu galo waxa ay yaallaan qolka imtixaanka. Haddii ay jiraan wax ka maqan oo aad waydo waa in aad waydiisaa Qiimeeyaha.
- Marka aad ka dhamaysid qayb xirfad ah waxa aad dhahdaa, waan dhameeyay."
- Haddii aad dareentid in aad khalad samaysay adiga oo ku dhex jira xirfad, waa in aad ogeysiisaa Qiimeeyaha oo aad u sheegtaa in aad dib ugu noqonaysid si aad u saxdid. Waxa kaliya ee aad dib ugu noqon kartaa xirfadda markaas aad samaynaysid. Marka aad dhahdid waan dhameeyay xirfaddan kuma noqon kartid.
- Marka uu Qiimeeyuhu ku siiyo Kaadhka Tilmaamaha, waxa laguu sheegi doonaa inta daqiiqadood ee aad haysatid. Wakhtiga aad haysataa waxa ay ku xiran tahay xirfadaha. Qiimeeyuhu waxa uu bilaabayaa wakhtiga laguu qabanayo marka aad bilawdid qaybta ugu horreysa, waxa kale oo lagu ogeysiin doonaa marka ay shan daqiiqadood ka hareen imtixaanka.
- Marka aad dhamaysid imtixaanka xirfadda ugu dambaysa waxa aad matashaa sidii oo aad shaqadii maalintaas u dhamaysay daryeel qaataha.
- Haddii Qiimeeyuhu uu arko xaalad ammaan darro oo weyn wakhtiga aad samaynayso imtixaankan, waa la istaajin imtixaanka xirfadda, qaybtaas xirfaddana waa la joojin.
- Waxa aad galaysaa imtixaan goboli ah. Qiimeeyuhu uma bannaana in uu ku caawiyo ama wax ku baro ama kaala hadlo natiijadaada.

Marka imtixaankaagu dhamaadu waxa uu Qiimeeyuhu samayn doonaa:

- In uu galiyo imtixaankaa xirfadda computerka oo ay ka soo bixi doonto natiijada imtixaanku.
- in uu ku siiyo warbixinta natiijadaada.

Qaanuunada guud ee kale ee imtixaanka waxa ka mid ah:

- Waa in la xidhaa telefoonnada, kamaradaha, iwm ama ay xareysnaadaan inta aad imtixaanka ku jirtid.
- Alaabaha kale ee aad wadato waa in ay xareysnaadaan inta aad ku jirto imtixaanka, laguumana ogola in aad isticmaashid inta aad imtixaanka ku jirtid.
- Imtixaankan lama ogola in buug laga eegto. wakhtiga aad imtixaanka ku jirtid lama ogola in aad eegtid qoraal ama buug ama buuga musharaha.
- Ma jiro wax fasax nususaace(biririf) marka imtixaanka lagu jiro.
- Haddii aanad imtixaanka ku galayn luuqad kale. Waxa KALIYA ee la ogol yahay in aad af Ingiriisi ku hadashid haddii aad imtixaan galaysid ama aad matalaysid daryeel qaate.
- Imtixaankaaga waa la joojin waana lagaa saari goobta haddii dhaqankaagu u xumaado ama aad carqalad keentid. Sidoo kale Qiimeeyuhu waxa uu meesha kaa saari doonaa haddii uu u maleeyo in aad qof kale imtixaanka u galaysid ama aad qishaysid.

Waxa kuu bannaan in aad su'aalo Qiimeeyaha ka waydisid tilmaamahan kadib marka uu ku siiyo kormeerka qolka imtixaanka.

Copyright © 2010 Prometric Inc., a Delaware corporation. All rights reserved.